

Waxa ay tahay In la ogaado Haddii aad tahay Qof iskii U shaqeysta, Xilliyo Gaar ah Shaqeeya 'Seasonal', ama Shaqaale Shaqo Ku meel gaar ah haysta 'Gig Worker'

Nooca Gaaban

Isbeddelo la xiriira federaalka awgood, laga bilaabo Janaayo 1, 2027, xubnaha ka tirsan OHP qaarkood ee da'doodu tahay 19–64 waa in ay buuxiyaan xeerarka shaqada ama hawsha marka ay codsadaan ama dib u cusbooneysiyaan caymiskooda. Tilmaamahani waxay sharaxayaan sida loo buuxiyo xeerarka oo la adeegsanayo shaqo lacag la qaadanayo oo leh lacago abaalgud ah 'tips' oo loogu talagalay haddii aad tahay qof iskii u shaqeysta, "gig worker," ama haysato shaqo xilli gaara la shaqeeyo 'seasonal' sida shaqooyinka beeraha ama shaqooyinka dalxiiska. Waxaa sidoo kale jira waxyaabo la iska dhaafayo oo kale, ama sababo aadan ugu baahnayn in aad buuxiso xeerarka. Waxyaabo dheeraad ah ka ogow [OHP.Oregon.gov/HR1](https://www.oregon.gov/HR1).



3 Siyaabood oo Loo buuxiyo Xeerarka Shaqada ama Hawsha ee OHP

Dooro midka ku habboon noloshaada. Uma baahnid in aad sameyso saddexdaba.

1

Dakhliga

Sameyso wax ka badan \$580 bishii.

2

Dugsiga

Aad diiwaan gashan tahay ugu yaraan waqtiga barkiis.

3

Saacadaha

Shaqo isku dhafan, tabarucaad, dugsi, ama tababar loogu talagalay 80 saacadood bishii.



Sida Loo xisaabiyo Dakhliga Shaqadaada aad iskaa U shaqeysato ama Xilliyada Gaarka ah aad Shaqeeyso 'Seasonal'

- OHP waxay hubisaa dakhliga qoyskaaga marka hore. Haddii ay tahay \$580 bishii ama ka badan ka hor canshuuraha iyo lacagaha la iska jaro, waad buuxinaysaa xeerarka. Qoyskaaga waxaa ka mid ah qofka aad isqabtaan, carruurtaada iyo qof kasta oo kale oo aad ku qorto cashuur celintaada.
- OHP waxay isticmaashaa dakhliga go'an ee ganacsiga canshuuraha ka hor. Taasi waxay ka dhigan tahay lacagta ganacsigaagu sii haysto ka dib kharashyada ganacsiga, sida gaaska, biilka telefoonkaaga, iyo kharashka app-ka.
- La soco lacagta aad sameyso (lacagaha abaalgud ah 'tips' sidoo kale!) iyo kharashka aad ku bixiso ganacsigaaga iyo saacadaha aad shaqeeyso bil kasta. Tani waxay gacan ka geysataa in aad buuxiso xeerarka.
- Haddii shaqadaadu tahay mid xilliyo gaar ah la shaqeeyo 'seasonal', soo dir caddeynta dakhligaaga ugu yaraan lixdii bilood ee la soo dhaafay. Haddii ay celcelis ahaan tahay \$580 bishii ama ka badan, waad buuxinaysaa xeerarka.
- Haddii uu dakhligaagu ka hooseeyo \$580, OHP waxay marka xigta hubisaa ka diiwaan gashanaanta dugsiga iyo saacadaha.

Waxa ay tahay In la ogaado Haddii aad tahay Qof iskii U shaqeysta, Xilliyo Gaar ah Shaqeeya 'Seasonal', ama Shaqaale Shaqo Ku meel gaar ah haysta 'Gig Worker'

Haddii OHP Macluumaad Dheeraad ah Kaaga Baahan tahay

Waxaad heli doontaa ogeysiin sheegaysa waxa la dirayo, sida, iyo goorta ay tahay.

Ma haysatid miyaa warqada saxda ee ku qoran ogeysiintaada? U sheeg OHP waxa aad haysato. Waxaa jiri karta siyaabo kale oo aad ku muujiso caddeyn. Waxaa dhici karta in aad dakhligaaga ka xaqiijiso dhanka internet-ka.

Si aad u muujiso dakhligaaga, soo dir mid ka mid ah kuwani:

- ✓ Nuqulada jeegaga mushaharka
- ✓ Warbixinnada bangiga ama maaliyadeed
- ✓ Qandaraas shaqo
- ✓ Foomamka canshuurta
- ✓ Diiwaannadaada gaarka ah ee in aad iskaa u shaqeysato, haysato shaqo madax-bannaan 'freelance', ama haysato shaqo ku meel gaar ah 'gig worker'. Fadlan soo raaci dakhliga guud iyo kharashyada ganacsiga labadoodaba, si aan u xaqiijin karno dakhligaaga go'an, iyo sida joogtada ah ee aad u heshay dakhligaaga

Si aad u muujiso saacadahaaga, soo dir mid ka mid ah kuwani:

- ✓ Warqadaha wakhtiga shaqo
- ✓ Diiwaannada hawlaha
- ✓ Diiwaanno ka socda shaqadaada
- ✓ Qoraal ka socda macmiil, nidaam 'platform', ama urur aad la shaqeyso

Talo bixin

Haddii aad la shaqeyso wax ka badan hal macmiil, nidaam 'platform', ama haysato shaqo ku meel gaar ah 'gig', la soco oo soo sheeg mushaharkaaga iyo saacadaha dhammaantood. Waad isku dari kartaa mushaharkaaga ama saacadahaaga si aad u buuxiso xeerarka. In aad hore ka soo sheegto waxay kaa caawin kartaa in aad iska ilaaliso codsi sii daba gal ah.

Xeerarka Shaqada ama Hawsha ee OHP:

Waxa ay tahay In la ogaado Haddii aad tahay Qof iskii U shaqeysta, Xilliyo Gaar ah Shaqeeya 'Seasonal', ama Shaqaale Shaqo Ku meel gaar ah haysta 'Gig Worker'



Waxa aad Sameyn Karto

- ✓ Cusbooneysii macluumaadka lagaala soo xiriirayo iyo wada xiriirka aad doorbidayso. Fariinta qoraalka ah iyo email-ka ayaa si cusub loo hagaajiyay!
- ✓ Ka soo jawaab ogeysiin kasta iyada oo leh taariikh ay ku eg tahay.
- ✓ Hubi waxyaabaha la iska dhaafayo ama siyaabo kale oo lagu buuxiyo xeerarka.
- ✓ Haddii aad sameyso lacag badan marka la eego OHP, waxaa dhici karta in aad weli u qalanto OHP Bridge ama qorshe kale oo ka socda Marketplace



Halka Laga helo Caawimaad oo laga Ogaan karo Waxyaabo Dheeraad ah



Ogow waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan HR1

<https://OHP.Oregon.gov/HR1>



Dhanka internet-ka – isticmaal App-ka Oregon ONE Mobile ee lacag la'aanta ah ama samee koontada Dhanka internet-ka ee ONE

<https://benefits.oregon.gov>

Wac

1-800-699-9075 (Wicitaanada gudbinta waa la soo dhaweynayaa)

Hel kaaliyaha OHP

<https://oregonhealthcare.gov/GetHelp>

Booqo xafiiska Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon

Xafiiska degaanka ka hel
<https://ODHSoffices.oregon.gov>

Ogow waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan OHP Bridge iyo qorshayaasha Caymiska Caafimaadka Oregon ee Marketplace

<https://OHP.Oregon.gov/Bridge>

<https://OregonHealthCare.gov>

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso oo lacag la'aan ah. OHP kala xiriir one.communications@odhsosha.oregon.gov.